Samverkan mot brott
**Grannsamverkan**
Neighbourhood watch

Billaabidda ku aaddan wada shaqeynta xagga:

Länsförsäkringar · Folksam · If... · Trygg Hansa · Moderna · ICA Försäkring · Dina Försäkringar · Polisen · SSF Stöldskyddsföreningen · brå · Villaägarna Villaägarnas Riksförbund · Hyresgästföreningen · Sveriges Kommuner och Landsting · Riksbyggen

In laga qeyb qaato Iskaashiga derisnimadu waa lacag la'aan.
Haddii aad dooneysid in aad wax dheeraad ah ogaatid,
la xiriir booliska aaggaaga, degmada ama shirkaddaada ceymiska.

Macluumaad dheeraad ah iyo foomam waxay ku jiraan
**samverkanmotbrott.se**



# Iskaashi derisnimo oo xagga guryaha ah

**– Wuxuu kor u qaadayaa ammaanka wuxuuna yareynayaa dembiyada**

Samverkan mot brott
**Grannsamverkan**
Neighbourhood watch




**Iskaashi derisnimo kor ugu qaad ammaanka jaranjarada gurigaaga iyo aagagga ku dhadhaw halkaas oo aannu si wadajir ah ku yareyneyno dembiyada iyo arbushaadaha.**

## Talooyin!

Meel ku qoro waxyaabaha aad aragtid ee la xiriira dembiyada, dabadeedna gal bogga **polisen.se** ee u tebi booliska waxa aad aragtay ama aad maqashay.

# 4

# waxa ugu yar ee Iskaashiga derisnimada

**1. Hawl**
Si guud ahaaneed u baraarugsanaw, booliskana kala xiriir 11414 haddii cid la tuhunsanyahay ay jirto, haddii uu jiro dembi markaas gacanta lagu jirana wac 112.

**2. Haddii aad guriga ka safartay**
Ku wargeli deriskaaga in aad safartay.


**3. Waxyaabaha qiimaha badan**
Si aamin ah u xafido waxyaabaha qiimaha badan – ma jirto meel fiican oo uusan tuuggu heli karin.

**4. Tallaabooyin ka hortagid ah**
Ku kalsoonaw talooyinka ka hortagga dembiyada.

## Tallaabooyin ka hortag ah

- Albaabka dibadda ku xir quful ansax ah.
- Waxaana aad u sii fiican in aad albaabka dibadda ku xirtid wax in la jibiyo ka ilaaliya.
- Hubi in aad daaqadaha iyo balakoonka u heshid qofullo – gaar ahaan haddii aad deggantihid dabaqa hoose, dabaqa 1 iyo dabaqa bakhaarka leh.
- Dhulka ma laga arkaa waraaqaha laguu soo diro haddii laga eego waraaqaha meesha laga soo rido? Sanduuq waraaqo oo ammaan ku rakibo xagga gudaha ee albaabka. Markaas tuuggu ma arki karyo in boosto ku jirto ama ma meesha waraaqaha laga soo rido ma u adeegsan karyo qalab gudaha wax looga furo.
- Dabool ku rakiba meesha albaabka laga furo ee xagga gudaha ah.
- Waxyaabaha qiimaha leh iyo aqoonsiyada sida tusaale ahan baasaboorka ku xira kaasafoorto tayadeeda la hubiyay.
- Sunto waxyaabaha qiimaha leh – waxay taasi kordhineysaa fursadahaaga ah in badeecooyinki lagaa xaday aad dib u heshid, tuuggana waxay ku adkeyneysaa in uu sii iibiyo.
- Qalab farsamo oo si xoog ah wax u badbaadin kara waa allaarmi qeylinaya – wuxuu gaabinayaa waqtiga uu tuuggu u haysto in uu guriga sii joogo, wuxuuna baraarujinayaa deriska.
- Waxaad ka dhigtaa in nalalku ay is daaraan, isna demiyaan, gaar ahaan marka ay dibaddu mugdi tahay.
- U daa raadiyaha in uu saacado ku shid-shidmo si markaas cod guriga looga maqlo.
- Nalal dhaqdhaqaaqa ku shidma ku rakib dibadda albaabka weyn- iyo laga yaabee albaabka balakoonka ee tusaale ahaan u furan beerta gudaha.
- Wax qiimo sidaas ah leh ha ku keydsannin maqaasiinka kore ama kan hoose.





# Haddii ay wax dhacaan

**Haddii uu jiryo tuhun ku aaddan dembi**
marka aad dhismada ku aragtid wax sida caadiga ah ka beddelan waxaa muhiim in aad si fiican ugu baraarugsanaatid oo aad qoratid waxa aad arkeysid, tusaale ahaan baaqyada, nambarrada gawaarida aadan horay urkin iyo wixii la mid ah. Waxaad sidoo kale booliska war ugu tebin kartaa 114 14 ama polisen.se. Is tus iyaga, iskuna day in aad xiriir la sameysid, tusaale ahaan waad salaami kartaa cidda aadan garaneyn. Haddii ay kuwaasi dembiilayaal yihiin wey joojin karaan marka ay fahmaan in la aqoonsanooyo.

**Haddii uu jiro dembi billawday**
Haddii uu jiryo dembi billawday, qeyladhaan booliska ugu dir 112, is tus, qoro baaqyada, una kuurgal waxa socda. La kulan booliska loo yeeray, wargeli wakiilkaaga xiriirka iyo deriskaagaba. Ha isku dayin adigu in aad gacantaada ku joojisid haddii aadan hubin in aad ku guuleysan doontid, waxaad khatar u geleysaa in adiga naftirkaaga xoog laguu adeegsado.

**Sidee baan guriga wax uga jawaabnaa?**
Waxaa muhiim ah in adiga iyo deriskaagu aad is caawisaan oo aad gacan ka geysataan ammaanka dhismada guriga. Halkan waxaa xiga talooyin fara badan oo siyaabo kala duduwan loogu dhaqmi karo.

- Maqnaashooyinkaaga gaagaaban u sheeg deriska (iyo xitaa wakiilka xiriirka haddii aad maqnaaneysid in dhawr maalin ka badan).
- Si caqli ah "u noqo fuduuli" haddii aad dhismada guriga ku aragtid dad aadan aqoon ama maqashid cod aan la micneyn karin. Ku dhiirro in aad weydiisid su'aalo sida; Yaad soo booqaneysay? Ma goor dhaw ayaad meesha soo degtay, horay kuuma aanan arkin?
- Ha u oggolaannin in dad aadan aqoon ay albaabka weyn ka soo galaan marka aad baxeysid ama geleysid, u arag albaabka weyn sidi in uu kuu yahay albaabka dibadda ee gurigaaga.
- U sheeg deriskaaga haddii shaqaale gurigaaga wax ka qabanayo.
- Cid deriskaaga ah ka codso in uu boostada guriga ku soo riixo haddii ay dibadda u soo baxsantahay.

## Akhriso wax dheeraad ah!

Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan Iskaashiga deriska, filmaan macluumaad iyo isku xirayaal la adeegsan karo waxaad ka heleysaa **samverkanmotbrott.se**






# Iskaashi derisnimo oo gurigiinna loogu tala galay

**Xirmadan yar ee qoraallada ah** waxaad ka heleysaa macluumaad ku aaddan sida loo billaabo, loona wado Iskaashiga deriska ee dhismooyinka guryaha badan leh iyo waxa la sameyn karo si dembiyada looga hortago.

Ulajeeddada laga leeyahay Iskaashiga derisku waa in aagga la degganyahay laga dhigo mid aan sidaas u soo jiidaneyn hawlaha dembiyada iyadoo kor loo qaadayo baraarugsanaanta dadka aagga degan iyo aqoonta ay leeyihiin sida leesu ilaalinayo, wax cabsi gelinaya oo wax ku adkeynaya tuugada.

**Hadafka laga leeyahay Iskaashiga derisku** waa in dembiyada la yareeyo iyo in ammaanka kor loo qaado oo sidaasna loo kordhiyo ku faraxsanaanta guryaha iyo aagga la degganyahay. Waxaa taas lagu gaari karaa in dadka dhismada guriga deggan ay wada shaqeeyaan, is taageeraan oo ay is caawiyaan dhinacba dhinaca kale, isla mar ahaantaasna ay sii fiican ugu baraarugsanaadaan waxa aagga ka dhacaya, xiriirna la lahaadaan booliiska. Iskaashiga derisku wuxuu sidoo kale kor u qaadayaa aqoonta xagga khataraha, sida dhaawacyada looga hor tegi karo iyo sida meesha uu degganyahay uu qofka uga hor tegi karo dembiyada.

# Sidee lagu billaabi karaa Iskaashi derisnimo oo xagga guryaha ah?

## Talooyin!

Urur guryo oo milkiyad qeyb ahaaneed ah wuxuu qofka lala xiriiro noqon karyaa mid ka mid ah guddiga oo horbaba leh kanaallo aad looga shaqeeyay oo uu kula xiriiryo dadka meesha deggan tusaale ahaan e-mail, sms ama app.






**Qofki doonaya** in uu jaranjaradiisa ka billaabo Iskaashi derisnimo wuxuu la xiriirayaa deriskiisa oo uu hubinayaa in ay si wax isula daneynayaan ama wuxuu la xiriirayaa milkiilaha/guddiga guriga oo isaguna dhankiisa la xiriiraya kuwa meesha deggan si uu u eego in ay arrinka daneynayaan. Haddii ay sidaas noqoto waxaa lala xiriirayaa booliiska xaafadda si loo billaabo Iskaashi derisnimo. Waxaa dhismada laga dooranayaa qof lala soo xiriiro oo isku xira booliska iyo dadka kale ee deegaanka.

**Guryaha milkiyadda qeyb ahaaneed ah** waxaa muhiim ah in milkiilayaasha dhismada guriga laga qeyb geliyo Iskaashiga derisnimada. Isxilqaankiisu waa muhiim haddii loo baahanyahay in tallaabo la qaado si loo xoojiyo ka ilaalinta jabsashada ee dhismada guryaha, si uu u bixiyo maqsinno looga shiro Iskaashiga derisnimada, loona kordhiyo iftiinka dhismada hareereheeda ah ama wixi la mid ah.

**Ka dib marka booliska** lala xiriiro wuxuu boolisku isugu yeeri doonaa kulan warbixin halkaas oo dadka meesha deggan waxbarasho lagu siinayo, aqoon qoto dheerna laga siinayo sida Iskaashiga derisku uu u shaqeeyo iyo waxa ugu muhiimsan sii wadidda shaqada si loo kordhiyo ammaanka, loogana hortago dembiyada. Waxbarashada xitaa laacibiin kale sida debdemiska, milkiilayaasha guryaha, shirkado iyo shirkado ceymis wey ka qeyb qaadan karaan.

**Tabbeellooyin iyo halkudhegyo** lagu dhedhejiyo albaabbada iyo daaqadaha si loo muujiyo in dadka deggan dhismadan ay ku firfircoonyihiin Iskaashiga derisnimada ayuu boolisku ka dalbanayaa Ururka ka gaashaamashada xatooyada.

**Tabbeelleyinku waxay muujinayaan** in dadka dhismada deggan:

- Ay qaateen waxbarasho ku aaddan Iskaashiga derisnimada iyo tallaabooyinka ka hortagidda dembiyada.
- Ay qaadeen tallaabooyin ka hortag ah.
- Ay si dheeraad ah u baraarugsanyihiin.
- Ay ogyihiin waxa ay tahay in ay sameeyaan haddii ay tuhunsanyihiin in dembi la gelayo.

**Laakin kuma filna** in tabbeellooyin Iskaashi derisnimo ah kor lagu dhejiyo si Iskaashiga derisnimadu uu saameyn u yeesho. Baraarugsanaan iyo isxilqaamid si wadajir ahaan looga hortago dembiyada dhismada iyo aagga ayaa aasaasi u ah Iskaashiga derisnimada.